# DARYEELKA CAAFIMAADKA AFKA EE QOYSASKA CARRUURTA LEH

Somali

Euroopan unionin osarahoittama

## Adeegyada daryeelka caafimaadka afka waxaa ka mid ah:

Talooyin ku saabsan daryeelka afka guriga iyo nafaqada

Baaritaannada ilkaha

Gargaarka degdegga ah

Daaweynta ilkaha

Daaweyn ilkaha oo takhasus ah

## Xilliga uurka

Haweeneyda sugaysa ilmaheedii ugu horreeyay waxay leedahay hal booqasho, halkaas oo lagu baaro caafimaadka afka iyo baahida daaweyn. Booqashadu badanaa waxay ku dhacdaa wadahadal.

Talo-bixinta caafimaadka waxaa lagu bixin karaa si shakhsi ah, koox ahaan ama kulammo wadajir ah.

## Ilmaha 1–6 jir ah

Caafimaadka afka ilmaha ayaa si joogto ah loo hubiyaa.

Ilmaha gee baaritaanka afka marka uu yahay

1-2 jir

3-4 jir

5-6 jir

## U gee ilmaha dhakhtarka ilkaha haddii

Ilmuhu uu xanuun ka dareemo afka marka uu cunayo, cabbayo ama hurdayo.

Aad ku aragto wax aan caadi ahayn afka.

**Adeegyada daryeelka afka waa u bilaash carruurta ka yar 18 sano.**

Pirkanmaan hyvinvointialue

TAMPERE

Tampereen ammattikorkeakoulu